



Amarada Difaaca Madaniga ah inta Lagu Jiro Aafada COVID-19

HADDII AAD KU JIRTO KHATAR DEGDEG AH

WAC 911

Haddii aad waajahayso rabshada qoyska
wac Laynka Qaran ee Rabshada Qoyska
24 saacadood maalintii

800-799-7233 ama www.thehotline.org

Booqo www.odvn.org si aad u hesho xogta la xiriirta rabshada qoyska qoyska
ee deegaankaaga



Muxuu Amarka Difaaca Madaniga ah (CPO) ii qaban karaa?

Haddii aad tahay dhibanaha rabshada qoyska, Muxuu Amarka Difaaca Madaniga ah (CPO) wuxuu kaa caawin karaa inaad badbaado.

Rabshada qoysku waa marka adigga ama qof guriga kula jooga uu dhibaato u gaysto qof kale oo ah lamaanaha ama ahaa lamaanaha, xaaska, wiilka saaxiibadeed ah, gabadha saaxiibadiis, ah ama qayb kale oo ah dadka guriga ama qoyska. Rabshada qoyska waxaa ku jira garaacida, dhibaataaynta, hanjabaada, ama in uu ku cabsi galiyo qofku asagoo ku daba galaaya ama kaa hor istaagaaya inaad si xor ah ku socoto.

Amarka Difaaca Madaniga ah (CPO) wuxuu ku amrayaa qof ku weeraraaya inuu kaa dheeraado muddo cayiman oo 5 sano ah. Ayadoo qayb ka ah Amarka Difaaca Madaniga ah, waxaad sidoo kale heli kartaa mulkiyad qudha oo ah guriga ama gaari ah, masuuliyada ku meel gaarka ah ee ilmaha aad isku dhasheen qofka, amar lagu qasbaayo qofka ku weeraray inuusan tagin dugsiyada iyo goobaha shaqada, iyo taageero lacageed.

? Sidee ayaan ku helayaa Muxuu Amarka Difaaca Madaniga ah (CPO) inta lagu jiro aafada COVID-19?

Inta lagu jiro aafada COVID-19, waxaad wali heli kartaa CPO. Maxkamadaha ayaa xadidi kara cidda imaan karta qolka maxkamada ama dacwada ku dhagaysan karta khadka taleefanka. Rabshada qoysku waa arin aad u xun waxaana loola dhaqmi karaa sidii xaalad degdeg ah oo kale. Haddii aad u baahan tahay CPO, wac hooyga rabashada qoyska ee deegaankaaga ayaga ayaana kaa caawin kara helitaanka CPO.

! Kadib markaad codsato CPO ay ku siiso Maxkamadu waxaa la qaban doonaa laba dhagaysi:

1. Dhagaysiga "halka dhinac" - waxaad u sheegaysaa garsooraha rabashada qoyska. Qofka xadgudubka gaystay ma joogaayo dhagaysigaan. Haddii garsooruhu ku siiyo dacwada "halka dhinac ah", waxaad heli doontaa amar looga mamnuucaayo qofka xadgudubka gaystay inuu kuu yimaado.
2. Qofka xad gudubka gaystay ayaa markaas kadib maxkamada u keenaaya dukumiintiyada maxkamada ayaana qabanaysa "dhagaysi buuxa," markaas oo Eedaysanaha loo fasaxaayo inuu yimaado maxkamada uuna qirto danbiga.

? Maxaan samaynayaa haddii qofka i weeray uu jabiyo Amarka Difaaca Madaniga ah (CPO) ee asaga ka dhanka ah?

Wac booliiska haddii qofka ku weeraray uu ku xad gudbo CPO ga asagoo kula soo iriiraya xariiraaya, kuusoo dhawaanaaya, ama samaynaaya wax amarku ka mamnuucaayo inuu sameeyo

? SEOLS iyo LASC ma i caawin karaan haddii aan u baahdo CPO inta lagu jiro aafada COVID-19?

Haa. Nasoo wac kadibna qareen ayaa kala hadli doona kiiskaaga khadka taleefanka.

Waxaan adeegyada sharciga oo bilaash ah siinaa danyarta Ohio iyo dadka waayeelka ah. Nasoo wac si aan kuu caawino:

614.241.2001 (Bartamaha Ohio) 833.288.2936 (Koonfur-Bari Ohio)

740.383.2161 iyo 888.301.2411 (Degmooyinka Delaware, Marion, Morrow iyo Union)

Legal Aid qofna uma takoorayso sababo la xariira isir, midab, wadanka uu kasoo jeedo, naafada, ama da'da marka la qoraayo, la daawaynaayo, ama uu ka qaybgalaayo barnaamijyadeeda, adeegyadeeda iyo shaqooyinkeeda, ama shaqada.

